JamhuuriyaddaFederalkaSoomaaliya.

BaarlamaankaFederaalkaSoomaaliya.

GolahaShacabka.

Hadal-qoraalkaka fadhiga 5-aad. **Taariikh: 22/9/2014**

Documentiga kalfadhiga 5-aad kulankiisa: 1-aad.

Kalfadhiga 5-aad.

Kulankiisa:1-aad sacada la furay.12:40 gh, sacad la xiray . 1:30 gd.

Guntinta: 139 xildhibaan.

Ajendaha:

1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka.

2. Ansixinta Ajendaha.

3. Warbixinta Deegaanada:

a) Nugaal, Xildhibaan MaxamedXuseenNuur (xagaafe)

b) Mudug, Xildhibaan, TahliilMaxamedCabdi

C) Shabeellada dhexe, Xildhibaan CabdullaahiAxmedXuseen

4. Qaybinta Khudbaddii Madax WeynahaeeFuritaankaKalfadhiga.

5. Qaybinta Motionka ku saabsan Qaraarkii Baarlamaanka ee la xiriiray Dekadda.

Shir-Guddoomiyaha, Guddoomiye kuxigeenka 2aad ee Baarlamaanka F.S. Mudane Mahad Cabdalla Cawad.

Waxaa shirka Furay Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Golaha Baarlamaanka F.S.

Mudane Mahad Cabbdalla Cawad, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyaya, xildhibaan: sheikh shaacir, Guddoomiyaha waxauuxildhibaanadauuweydistay in ay ansixiyaan Ajendaha weyna Ansixiyeen.

Intaaka dib Guddoomiyaha Golaha waxa uu soo jeediyay, in warbixinta deeganada cidii soo jeedin la heyd in ay ku soo dhawaato.

Xildhibaan Cabdi Samad Macalin Maxamuud waxa uu soo jeediyay warbixinta deegaanada in ay ku haboontahay in la siiyo waqti badan maadama ay farabadanyihiin warbixinta deeganada hadana uu waqtiga yaryahay.

Guddoomiyaha Golaha ayaa xildhibaanada u soo jeediyay, xildhibaano ma ku raacsantihiin ra'yiga xildhibaan Cabdisamad, xildhibaanada waxey sheegen in ay ku raacsanyihiin ra'yiga u soo jeediyay, xildhibaan cabdisamad macalin maxamud.

Intaaka dib Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada uu u sheegey,inuu noo yaalo motion la soo gudbiyay oo kusaabsan Dekada Caalamiga ah hishiis lala galay shirkad AL-BAYRAKH EE TURKIGA ah, cidii inoo akhrin la heyd moshinkan ku soo dhawow.

Xildhibaan: C/qaadir Maxamed Sandheere, waxa uu akhriyay,moshinka ka dhanka ah jabinta Qaraarkii Baarlamaanka ee la xiriiray shirkada ALBAYRAKH ee Dekadda Muqdisho,waxaan halka an kuugu soo gudbinaynaa mooshinka dhan ah amar ku taagleynta iyo jebinta qaraarkii Baarlamaaniga ahaa ee la xiriiray shirkada AL-BAYRAKH ee TURKIGA ah ee la sheegey in la gu wareejinayo Dekadda Muqdisho iyada oo aan la soo marin habsharciyeedkii ahayd in loo maro maalgashiga caala-miga iyo ka howl gelida goobaha u asteysan in ay yihiin halbowlayaasha Dhaqaalaha Qaranka sida Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha I.W.M.

Mudane Guddoomiye sidaad la socotidba, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaal-ka Soomaaliya, wuxuu si buuxda ugu codeeyay in Shirkadda ALBAYRAKH

ayna ka howlgali Karin Dekadda Muqdisho inta sharciyadeeda la waafajinayo dibna loogu soocelinayo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Mudane: Guddoomiye waxa kaloo ihaano ku ah Baarlamaanka in maamulka ALBA-YRAKH ay mar walba si jeesjees ah ugu dhahaan shacabka hortiisa marka la wareysto in qaraarka gaaray arimahoodai nta ay qoslan yiraahdan anaga Baarlamaan iyoGole Wasiiro midna ma naqaanee waxaana siiyay Dekadda Muqdisho Madaxweynaha JFS, arinka asoo si aad ah ugu careysiiyey Xildhibaanada iyo xoogsata daka howlgashoDekadda oo hada lagu yiri isaga baxa.

Mudane: Guddoomiye waxaan moshinka an kuu soo raacinay cabasho Howlwaden-nada shirkadaha maraakiibta, xoogsatada Majakuus iyo Muruqmaalba, waxaan kaloo halkan kuu soo raacinay waxqabkii iyo hantidii la galiyey Dekadda.

Guddoomiye kuxugeenka 2aad Mudane :Mahad Cabdalla Cawad, wuxuu soo jeediyey,waxan rabaa in aan idiinla wadaago warqad qaraal oo ka timid xafiiska Hantidhowrka guud oo ku saabsan heshiiska lala galay shirkaddaTurkiga,sida uu qabosharci **No:2 ee 29/12/1961 qod.8aad, 33aad iyo 35aad,** ee nidaamka maamulka xisaabaadka Dowladda, ayaa waxaa waajibku ah hay'adaha dowladda in heshiisyada iyo Qandaraasyada ku saabsan dhinaca maaliyadda ee ay la galaan dowladaha kale ama dhaxdooda in loo soo gudbiyo xafiiska Hanti Dhowrka Guud ee Qaranka Heshiiskaas oo Original ah si loo Diiwaangeliyo.

Hadaba, Xafiiska Hanti dhowrka Guud ee Qaranka,waxaa Mas'uliyadihiisa ka mid ah in uu dib u eegis ku sameeyo dhamaan Heshiisyada dhinaca dhaqaalaha ah iyo Qandaraasyada si uu u hubiyo inay waafaqsanyihiin nidaamka Maamulka Xisaab-aadka Dowladda oo uu ka eego danta ugu jirta Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed hes-hiisyada iyo Qandaraasyada lala galayo Dowladaha kale iyo Hay'adaha Dowlada dhexdooda ee quseeya dhinaca dhaqaalaha.

Sidaas darteed,waxaan Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ka dooneynaa

- In ay cadeeyso danta Heshiiskaan ugu jirto Dadka Soomaaliyeed iyo Dalkaba.

- Inta Shirkadoodee la tartan siiyey.

- Inta sanno ee uu soconayo Heshiiskan.

- Waayo arragnimada iyo mudadii ay shaqeyneysay shirkadan iyo meelihii ay ka

Soo shaqeysay.

-In la cadeeyo in Wakaaladda Dekadda Xamar uu ku egg-yahay Heshiiska iyo in uu

Saameeyo Hay'adaha kale ee Dowladda ee Dekada ka howlgala.

-Cidda u Saxiixday Dowlada Soomaaliyeed.

- Sida loo kala qaadanayo dakhliga ay soo xareeyso shirkadaas.

Intaaka dib Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Baarlamaanka F.S., waxa uu soo jeediyey,waa in leysku diyaariyaa dhamaanten Guddoomiye iyo xildhibaanba,waa in loo yeero Wasiirka su'aalo la weydiyo kadibna uu kajawaabo.

Xildhibaan: Bashiir Cadow, waxa uu soo jeediyey, moshinkan wuxuu tixraacayaa go'anka Baarlamaanka, aniga ma qabo in wasiir loo yeero ee waa in loo yeero Rai'sal Wasaaraha isaga ayaana laga sugayaa warbixinta Dekadda ku saabsan.

Xildhibaan: Maxamed Cabdullahi Fadhaye, wuxuu sheegey,anoo tixraacayno Dukumentigii naloo qeybiyay kalfadhiga-4aad, 2dii April 2014ka, ayuu Baarlamaanka ka gaaray qaraar in aan lagu wareejin Karin Dakadda shisheeye,marka umabaahnin wasiir iyo maareyemidna, waa in uu noo yimaadaa Rai'sal Wasaaraha, waxaa boob iyo dhac lagu hayaa dalka, anaga ayaa shacabka meel walba u joogna, maareye Dakadd ma wareejin karo,waxaan laheyn sharci waa in la dhaqangaliyaa 1960kii, waxan soo jeedinaya, in loo yeero Rai'sal Wasaaraha, si su'aalo loo weydiyo.

Xildhibaan: Maxamed Cumar Dhalxa, wuxuu soo jeediyey, siday ku bilaabatey um-aleyn maayo in hal wasiir ay ku ikaandoonto, wasiirka maalintii noogu dambeysey arintaas waa iska bariyeelay,wuxuuna cadeyey in uu san waxba ka ogeyn arinta Dekadda, saakey raad iyo muqdisho waxan ka dhageystey wasiir oo kahadlayo oo sheegey,in 55% soomaaliya ay leedahay 45% ay ledahay shirkada ALBAYRAKH,marka ugu horeyso anagamaba heyno hishiiskan waa in aan ogaano in ay dan inootahay iyo in kale, waxaan qabaa marka hore in la keeno Wasiirka,

mar kaxigta in loo yeero Rai'sal Wasaaraha, Wasaarada Arimaha dibada maxey ka ogtahay maalgashigaan.

Xildhibaan: Tahliil, waxa uu sheegey, Baarlamaanka Qaraar ay uu soo saarey waa in aan ku xisaabtano sidee u fuli waayay qaraarkeena waa sharcidaro,annaga waa in aan u yeernaa Rai'sal Wasaaraha Su'aalana weydiina, Raisal Wasaaraha hadii uu doonoWasiirkiisa isaga su'aalo ha weydiyo.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha ayaa soo jeediyey, xildhibaano hada waxaan isku raacney in aan u yeerno Raisal Wasaaraha uu Baarlamaanka Horyimaado ama wasiir ha so owatee ama guddi ha soo dirsado,waa in aan u yeernaa.

Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegey,hishiiskan mar hore ayaan laheyn hanalo keeno, maxaa nalooga qarinayaa waxaa lagayaabaa in uu fiicanyahay, Rai'sal Wasaaraha qoraal ayaan u qoreynaa,waxaan leenahay noo soo gudbi hishiiska, adigana noo imow Mudane: Rai'sal Wasaare.

Shir Guddoonka Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Baarlamaanka F.S.

Mudane:Mahad Cabdalla Cawad, uu shir Guddoominayay kalfadhiga 5-aad,ku-lankiisa:1-aad uu sheegey in uu shirka xiranyahay sacada markey aheyd 1:30gd.